VÄL
Vänersborgs kommuns lärplattform

VÄL – Xarunta waxbarashada ee degmada Vänersborgs

Xafiiska maamulk waxbarashada iyo caruurta ee dugsiyada xanaanada caruurta, dugsiyada hoose dhexe iyo guriga xilliga firaaqada (fritidshem) waxay ku jiraan xalka buuxa ee warbixinta, isgaarsiinta – farsamada kaasoo mudnaanta koowaad siinaya baahida hawlaha islamarkaana ka tarjumaya jihada qorshe iyo aragtida degmada.

Waxaynu aaladda interneetka u isticmaaleynaa cunsur wax ku ool leh ee fidinta warbixinta iyo isgaarsiinta. Xafiiska maamulka waa inuu markaa ka faa'ideystaa fursadda ay taasi keeneyso. Xarun waxbarasho ee ku salaysan hab elektarooni ee bogga internetka ayaa wuxuu kor u qaadayaa iskaashiga wadashaqeynta, isgaarsiinta, qoraalka warbixinada, qorshaynta, warbixinta iyo maamulka.

Mas'uuliyiinta daryeelka caruurta ayaa waxay dareemayaan adeeg tayo sare leh oo xal buuxa u helaya caruurta ku jirta dugsiga xanaanada iyo dugsiga hoose dhexe. VÄL waa xarunta saldhigga waxbarashada halkaasoo warbixinadu ay ka helayaan qoyska oo dhan (1-16 sanno) maalintii oo dhan.Halkan waxaad kagala socon kartaa horumarka aqoon ee ilmahaaga, ku soo gudbin kartaa warbixin marka caruurtu ay maqnaanayaan,ka ogaan kartaa jadwalka caruurta, diiwaangelin kartaa jadwalka caruurta, kagala xiriiri kartaa macallimiinta,ku ballansan kartaa wadahadalka hourmarka caruurta, ku soo gudbin kartaa warbixinta isbedelka ku dhacay dakhliga iyo waxyaabo kale.

Barn- och utbildningsförvaltningen

Postadress	Besöksadress	Telefon	Telefax	E-post	Hemsida
462 85 Vänersborg	Sundsgatan 29	0521-72 11 04	0521-72 13 70	barnutbildning@vanersborg.se	www.vanersborg.se

Soo gudbinta maqnaanshaha ardayda *(khusaysa dugsiga xanaanada, hoyga xilliga firaaqada iyo dugsiga hoose dhexe)*

Maalin buuxda

Maqnaanshaha maalin dhan waxaa soo wargelinta loo sameyn karaa maalinta lagu jiro iyo maalinta xigta. Dooro haddii ay tahay maqnaanshaha maanta iyo/ama berrito. Markaa ayaa la soo diri karaa wargelinta maqnaanshaha.

Qayb ka mid ah maalinta

Haddii wargelintu ay ku saabsan tahay qayb ka mid ah maalintii markaa waa inaad calaamadaysaa doorashada noocaas ah. Kadibna waxaad riixeysaa liiska hoos loo soo jiidayo ee taariikhda kadibna caalamadee taariikhda maalintaa. Kadibna waxaa lagu buuxinayaa waqtiga.

Haddii wargelintu ku saabsan tahay laba waqti kala duwan ee isla hal maalin markaa waxaad riixeysaa meesha ay ku qoran tahay ”ku dar waqti kale” *(Lägg till tid)*. Haddana waqti kale waa lagu buuxin karaa. Marka diiwaangelintu ay dhammaato waxaad riixeysaa meesha ay ku qoran tahay ”Soo dir maqnaanshaha” (*Skicka frånvaro*) .

Maqnaanshaha la soo wargeliyey

Halkan waxaad ku arki kartaa maalmaha maqnaanshaha la soo wargeliyey iyo munaasabadaha. Haddii codsi wargelin khalad ah la soo diray wuxuu qofku u tirtiri karaa asagoo riixaya dembiisha qashinka ee sadarka ugu hooseeya ee ku jirta wargelinta khaladka ee maqnaanshaha. Haddii waqtiga la soo gudbay markaa wax dembiisha qashinka ee la arkayaa ma jiro markaana lama tirtiri karo wargelinta maqnaashaha.

Maqnaanshaha la soo wargeliyey

Halkan waxaad ku aragtaa maqnaanshaha uu iskuulku diiwaangeliyey. Meesha ugu horeysa bogga ayaa waxaad ku dooran kartaa haddii aad rabto inaad aragto maqnaanshaha sabab leh iyo kan sabab la’aan ahaa. Maqnaanshaha sabab la’aanta ah ayaa badanaaba waxaa lagu arkaa calaamad casaan ah kan sababta lehna calaamad madow. Waxaa soo raaca waqtiga ay ilmuhu maqnaayeen iyo taariikhda maalmaha.

Farriinta uu maamulka dugsigu u dirayo mas’uuliyiinta caruurta marka uu jiro maqnaansho aan sabab lahayn iyo soo daahid

Marka macallinku uu xaadiriyo maqnaanshaha ardayda wuxuu diyaarinayaa ardayda maqan si aan sabab lahayn/soo daahay warqad farriin ku socota mas’uulka xanaanada ilmaha. Farriintaa waxay ugu imaaneysaa hab farriinta SMS iyo habka boostada elektarooniga, ayadoo ay ku xiran tahay in emaylkoodu ku diiwaangeshan yahay nadaamka boostada elektarooniga xafiiska.

Maqnaansho aan sabab lahayn waxaa ka mid ah ”daahitaan” iyo haddii ardaygu uusan ka qayb gelin casharada.

Jadwalka caruurta *(wuxuu khusayaa keliya dugsiga barbaarinta iyo xilliga firaaqada)*
Mas'uulka daryeelka carurrta ayaa dooran kara inuu diiwaan geliyo jadwalka waqtiga iyo/ama dulmar ku sameeyo jadwalka lasoo gudbiyey.

Is diiwaangelinta
Haddii caruurtu ay haystaan in ka badan hal boos ee dugsi waxay waalidiintu haystaan markaa fursad ah in ay doortaan booskay rabaan.
Jadwalka taariikhda (kalandarka) ayaa waxaad ku dooraneysaa bisha iyo todobaadka ee jadwalka lagu diiwaangelinayo. Calaamad cagaar ee jadwalka ayaa waxay la mecne tahay in jadwal lagu diiwangeliyey todobaadkaa.

Calaamad **buluug** ah waxay la mecne tahay in jadwalka lagu diiwaan geliyey laakiinse aan meesha lagu xafidin.
Jadwalka todobaadlaha aan wadan calaamad wuxuu la mecne yahay in aan wax jadwal la diiwaangelin todobaadkaa.

Fasax maqnaansho todobaadkoo dhan
Calaamadee wareegga ku qoran *Ledig hela veckan*, haddii ilmuhu ay fasax ahaanayaan todobaadkoo idil. Wax xilli jadwal la siin karo ma jiro haddii doorashadan la calaamadeeyey.

Diiwangeli xilliyada jadwalka
Mas'uulka daryeelka caruurta ayaa wuxuu diiwaangelin karaa xilliyada jadwalka maalin walba iyo/ama uu ka tago maalmaha fasaxa ayagoo bannaan. Ugu yaraan hal maalin oo waqtiyada la socdaan waa in la qoraa inta aan jadwalka lagu xafidin todobaadkiiba.

Waxaad dooran kartaa inaad jadwalkaaga u diiwaangeliso laba hab aragti:

Habka Kantaroolka :

Soo jiid kantaroolka si aad u xadido waqtiga bilowga iyo dhammaadka. Riix badhanka iyo kantaroolka waqtiga si aad ugu darto boos ku habboon jadwadlka waqtiga ee maalinta, ugu badnaan saddex saacadood. Riix badhanka leh calaamadda istallaabta si aad u tirtirto waqtiga la xadiday.

Habka aragtida waqtiga:
Riix badhanka wata calaamadda toganaha (kudar +) *(+ Tidsspann)* si aad ugu darto boos kale ee jadwalka waqtiga maalinta ah, ugu badnaan saddex saacadood. Riix badhanka wata calaamadda tabanaha (kajar -) si aad u tirtirto wareeg saacad la kaydiyey.



´Makiinada Kantaroolka ”Slider”´ waa habka aragtida ee hore loo riixay oo lagu kaydiyey. Haddii aad rabto inaad bedesho aragtida la kaydiyey waxaad riixeysaa geeska ugu koreeya ee dhinaca midig kadibna ka tirtir calaamadaynta.



Hawlaha guud
Wadarta waqtiga guud ayaa sheegaya cadadka waqtiga jadwalka ee loo diiwaangeliyey todobaadka.

Badhanka *Återställ vecka* wuxuu tirtirayaa waqtiyada hore loo magacaabay.
Badhanka *Upprepa vecka* waxaa loo isticmaalaa marka la sawiro ama koobiyeenaayo jadwalka todobaadlaha, si kadibna loogu sawiro ama koobiyeeyo jadwalka todobaad kale.
Badhanka *Klistra in vecka* wuxuu meesha ku dhejinayaa todobaadkii la sawiray.
Badhanka *Bekräfta ändrade schemaveckor* wuxuu u kaxeynayaa waalidka caruurta inuu kor ka wada fiiriyo dhammaan halka uu fursad u haysto inuu kaydiyo.

Marka mas’uulka waalidka uu riixo badhanka *Bekräfta ändrade schemaveckor* waxay markaa u imaaneysaa guudmarka warbixinada oo dhan halkaasoo ay ka jirto fursad ah in la arko todobaadyada, maalmo iyo xilliyo ee lagu diiwaangeliyey. Haddii ay jiraan walaalo markaa lagu meeleeyey iskuul waxaa jirto fursad ah in jadwalka loo sawiro walaalaha. Marka goobaha la wada qaybsanayo mas’uulka caruurta ee diiwaangeliyey waqtiga wuxuu arkayaa xarfaha magaca ugu horeeyo uu ka bilowdo.

Haddii uu rabo waalidku inuu dib u noqdo oo uu diiwaangeliyo todobaadyo badan ama uu wax ka beddelo waqtiyada todobaad wuxuu riixayaa badhanka ay ku qoran tahay *Tillbaka*.

Marka mas’uulka waalidka uu ka dhameysto jadwalka waqtiyada wuxuu riixayaa badhanka *Skicka in*, jadwalka markaa waxaa lagu kaydiyey nadaamka waxaana u soo baxaysa xaqiijin in la kaydiyey.

U sawir jadwalka walaalaha

Waxaa macquul ah in loo sawiro jadwalka mid ama in ka badan oo walaalo ah.Jadwalka hadda jira ee walaalaha markaa waxaa lagu bedelayaa jadwalkan.

1. Calaamadee wareegga istallaabta ee *kopiera schema till syskon.*
2. Calaamadee walaalaha loo sawirayo jadwalka.
3. Haddii walaaluhu ay haystaan in ka badan hal boos markaa waa inaad mid doorataa.

Boosaska la qaybsanayo, waalidiintu waxay soo diri karaan mid walba jadwalkiisa

Haddii waalidiintu ay ku kala nool yihiin cinwaano kala duwan markaa waa iney labaduba soo diraan mid walba jadwalkiisa, midkoodna jadwalkiisa laguma dul qorayo kan kale ee nadaamka kombiyuutarka wuu isku wada darayaa jadwalka labada waalid oo uu ka dhigayaa hal jadwal ee ay ilmuhu leeyihiin.

Xasuusin

Haddii jadwalka la la'yahay waxaa loo dirayaa waalidiinta xasuusin in jadwalku maqan yahay oo loo baahan yahay in la diiwaangeliyo .

Dib u eegista jadwalka

Guudmarka jadwalka ayaa waxay waalidiintu ka arki karaan guudmarka jadwalka hal bil ee caruurtooda.

Waxaa meesha ka muuqda bisha lagu jiro, adeegso falaadhaha si aad u tagto bishii hore ama bisha soo socota.

Meelaynta boosaska ee la xidhiidha jadwalka ayaa lasoo bandhigayaa, haddii ay jiraan in ka badan hal meelayn boos waxaa lagu arkayaa liiska laga dooran karo meelaynta boosaska. Taariikhda bilowga iyo taariikh walboo dhammaad ayaa meesha lagu arkayaa.

Riix meesha ay ku qoran tahay *Visa alla* ee ka hooseysa *Månadsöversikt* si aad u aragto warbixinta jadwalka ee bisha la doortay. Riix meesha ay ku qoran tahay *Visa färre* si aad u xirto guudmarka warbixinta bisha.

Keenid iyo kaxaynta caruurta
Hawshani waxaa lagu diiwaangelinayaa waalidka ama qof weyn oo mas'uulqaad ah ee xaq u leh in uu caruurtiisa keeno kadibna ka kaxeeyo dugsiga. Warbixintan waxay shaqaaluhu ku arkayaan VÄL.



Riix badhanka *Lägg till person* ka dibna ku dar qofka



Ka dibna buuxi meesha banaan. Qaybta khasabka ah in la buuxiyo waa Magaca iyo lambarka telefoonka. Marka aad buuxisay qaybtaa waxaad riixeysaa badhanka kaydi.
Adigoo riixaya badhanada ayaa waxaad fursad u haysataa inaad tirtirto ama wax ka bedesho warbixintada loo kaydiyey qof.

Haddii la haysto daryeel caruur wadajir ah laakiinse ay labada waalid kala cinwaan ku kala nool yihiin, markaa mas'uuliyiintu waxay keliya arkayaan dadka ay ayaga u keydiyeen warbixinta ee ma arki karaan warbixinda uu kaydiyey waalidka kale.

Fariimaha SMS
Qofka mas'uulka caruurta ama waalidka ayaa wuxuu si sahlan warbixin ugu diri karaa dugsiga xanaanada caruurta iyo hoyga xilliga firaaqada. Kadibna warbixinta waa la arki karaa oo ay akhrin karaan shaqaale xirfad u leh. Haddii warbixinta lasoo diro maalin ka hor maalinta la rabo hawsh a markaa waa in la soo diraa wixii ka dambeeya saacadda 18.00.

Badhanka - Meddelande: INFO Personnummer Valfri text

Tus.: INFO 010814-NNNN Farmor hämtar kl 14.00

Kantaroolka farriimaha waxaa lagu sameynayaa nadaamka shaqada markaana haddii wax qalad ahi dhacaan waxaa la soo dirayaa farriinta qaladka. Haddii lambarka telefoonka iyo lambarka shakhsiga ay is waafaqaan markaa warbixinta waxaa lagu xafidayaa nadaamka meesha.

Faahfaahin xidhiidh
E-mail: valsupport@vanersborg.se